


BAXAAR

Boqorkii Webiga


Waxaa ka sheekeynaya
Cabdiraxmaan Maxamed Abtidoon



AMA Books Co.
London 2010


Sheeko sheeko...Sheeko xariiro...

Beri baa...




Tuulo ku taalla daanta webiga Shabeelle ayaa waxaa ku noolaa dad beeraley ah, tuuladu wey yareyd dadka degenna wey is wada yaqaaneen.






Dadka tuulada ku nool waxaa ka mid ahaa nin baxaar⁽¹⁾ ah oo yaxaasyo lahaa. Dadka tuuladu wey ka baqi jireen ninkaa baxaarka ah, waxayna aaminsanaayeen in baxaarku yaxaasyada la hadlo oo uu u adeegsado danihiisa ruuxuu doonana uu ku diro markaana yaxaasku cuno...


(1) Baxaar: waa nin yaxaasyada la hadla waxaana looga sheekeystaa dhulka webiyadu maraan





waxa kaloo ay ku sheekeysan jireen in marka baxaarku doonayo in uu u yeero yaxaasyada uu laan geed oo caleemo leh ee uu wax ku akhriyey uu biyaha webiga dul saaro yaxaasyadana sidaa aay ugu yimaadaan...






Baxaarku wuxuu lahaa afar yaxaas, mid weyn iyo saddex sif⁽²⁾ ah. Yaxaaska weyn wuxuu dool ku tagi jiray meelo fog fog, kuwa sifka ahna waxay ka ag dhawaayeen tuulada...


- (1) Sif: waa yaxaasyada yar yar, waxaa kaloo la yiraahdaa kuwa cillanka ah.
- (2) Dool: marka meel fog loo qaraab tago.






Hilada ay dadku biyaha u soo doontaan dhankeeda kale oo ay geedo waaweyn ku yaaleen ayaa marmar lagu arki jiray iyaga oo jiifa.


(3) Hilo: halka biyaha webigu dadka iyo xooluhu ka cabbaan lagana dhaansado






Baxaarku wuxuu ahaa nin oday ah wuxuuna qabay naag qurux badan...







dadka tuuladu waxay ku xaman jireen in maalin uu yaxaasyada mid ka mid ahaa uu u diray naagtaas si uu ugu soo qabto markuu u keenayna wuxuu naagtii kala doorsiiyey in uu guursado iyo in uu yaxaaska ku diro markaana yaxaasku cuni doono, sidaasna ay naagtii ku yeeshay in uu guursado baxaarka.







Dadku markay wax ka sheegayaan baxaarka wey ka baqan jireen oo iyagoo gabbanaya ayey wax ka sheegi jireen.







Baxaarku wuxuu dhalay wiil yar oo Cumar la yiraa. Wuxuu ahaa wiil madluun ah maxaa yeelay in badan ayuu maqli jiray dadka tuulada oo aabihii wax ka sheegaya. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa baxaarku arkay Cumar oo madluunsan, markuu weydiiyey sababtana Cumar waxa uu u sheegay aabihii waxa ay dadka tuuladu ku sheekeystaan oo ah in aabihii uu yahay nin xun oo dadka yaxaasyo ku dira. Baxaarkii ayaa markaa u sheegay wiilkiisa Cumar in uu maalin maalin maalmaha ka mid ah uu u sheegi doono sir weyn oo isaga Cumar ah iyo dadka tuulada degenba anfici doonta. Cumar wuu farxay wuxuuna aad u dhowrayey in uu maalintaas gaaro.





Maalin maalmaha ka mid ah ayaa baxaarku u yeeray wiilkiisii Cumar wuxuuna ku yiri “wiilkeygiiyow waxaa la soo gaaray maalintaan kuu sheegi lahaa sirtii weyneyd ee dhegahaada si fiican u fur: Yaxaasyadan iyagoo yar yar ayaan xannaneyn jiray oo aan quudin jiray sidaas ayeyna iigu yimaadaan markaan webiga u soo dhawaadaba ilaa iyo haddana aan u xanaaneeyaa gaar ahaan kuwa yar yar, laakiin in aan u adeegsado danahayga oo aan dadka ku diro run maaha, maadaamase dadku sidaa qabaan waxaan uga faa’ideystaa cabsidooda oo aan u sheegaa ruuxii webiga qashin ku shuba ama gooya geedaha webiga u dhow kuwaasoo ka ilaaliya webiga fatahaada in aan yaxaasyada ku diri doono, waana sababtaas darteed waxa ay geedaha u waaweynaadeen webiga iyo berrigana ay nadiif u yihiin.





Dabadeed Cumar wuu farxay wuxuuna ku fekeray in uu isagana baxaar noqon doono markuu weynaado.

